DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 21AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 27/12/21 | Lam. 05 |
|---|---|---|---|

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA LA-DAGAALANKA MAANDOORIYAHA

## TUSMADA


| | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga La-dagaalanka Maandooriyaha** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.05 ee 11ka December 2021, kuna saabsan Ansixinta Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay **XGGW/DPL/80/2021**, kuna taariikhaysan **December 01, 2021.**

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/80/2021 Garoowe, Arbaco, Taariikh: - 01/12/2021

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo: - <u>Ansixinta Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha</u>

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/209/2021 ee November 01, 2021, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Xeerka Kharmiga iyo Xashiishadaha.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Khamriga iyo Xashiishadaha Xeer Lr.18 ee 2010.

**MARKUU ARKAY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 49-aad, fadhigiisii 10-aad ee 14.11.2021 cod gacan taag ah **(35)** Mudane ku ansixiyeen Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha, halka ay diideen **(2)** Mudane, cid ka aamustayna aanay jirin **(37)** Mudane ee Guntanka (Qouram) fadhiyey.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha DPL.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND ★ OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

# XEERKA LA DAGAALANKA MAANDOORIYAHA

## NOFEEMBAR, 2021

## GAROOWE, PUNTLAND-SOOMAALIYA

# Tusmada Xeerka


Erey-Bixin

Cutubka 1-aad ........ 1

Qodobo Hor-dhac ah ........ 2

Qodobka 1-aad ........ 2

Magaca Xeerka ........ 2

Qodobka 2-aad ........ 2

Ujeeddada Xeerka ........ 2

Qodobka 3-aad ........ 2

Mabaadi'da Xeerka ........ 2

Cutubka 2-aad ........ 2

Fal-dambiyeedka iyo Ciqaabaha ........ 2

Qodobka 4-aad ........ 2

Reebnaan ........ 2

Qodobka 5-aad ........ 2

Ciqaabaha ........ 3

Qodobka 6-aad ........ 3

Shaqaalaha Dawladda ........ 4

Qodobka 7-aad ........ 4

Mas'uuliyiinta Dawladda ee Xasaanadda ........ 4

leh iyo kuwa aan Xasaanadda lahayn ........ 4

Qodobka 8-aad ........ 4

Ciidamada Nabadgelyada ........ 5

Qodobka 9-aad ........ 5

Isticmaalka Daawooyinka ........ 5

Cutubka 3-aad ........ 5

Xarig iyo La Wareegid ........ 6

Qodobka 10-aad ........ 6

La wareegidda Gaadiidka iyo Maandooriyaha ........ 6

Qodobka 11-aad ........ 6

Guryaha Lagu iibiyo Laguna Kaydiyo Maandooriyaha ........ 6

Qodobka 12-aad ........ 6

Hubka Lagu soo qabto Hawlgallada La-dagaalanka Maandooriyaha. ........ 6

Qodobka 13-aad ........ 6

Lacagaha Lagu soo qabto Hawlgallada La-dagaalanka Maandooriyaha ........ 7

Qodobka 14-aad ........ 7

Ciqaabaha iyo Ganaaxyada ........ 7

CUTUBKA 4-aad ........ 7

QODOBO GUNAANAD AH ........ 7

Qodobka 15-aad ........ 7

Magdhaw ........ 7

Qodobka 16-aad ........ 7

Laalid ........ 7

Qodobka 17-aad ........ 7

Dhaqan-galka Xeerka ........ 7

........ 7


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

# Erey-Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada iyo weeraha soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan soo socota;-

| Lr. | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka la-dagaalanka Maandooriyaha Dowladda Puntland. |
| 2. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 3. | **Maxkamad** | Waxaa loola jeedaa maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaha ka dhanka ah maandooriyaha. |
| 4. | **Maandooriye** | Waxaa loola jeedaa wax kasta oo isticmaalkiisu beddelo xiska qofka isticmaala, kaasoo keeni kara sakhrad muddo dheer ama muddo gaaban, sida Khamriga, Xashiishadaha IWM. |
| 5. | **Caadayste** | Waxaa loola jeedaa qofka oo markale ku laabta fal-dambiyeed horay ugu caddaaday oo loogu xukumay sida ku cad Qodobka 61-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. |
| 6. | **Isticmaal** | Waxaa loola jeedaa sifo kasta oo loo qaato maandooriye sida; cabid, qiijin, dhuuqid, shidasho, cunid, isku durid irbad, ursasho IWM. |
| 7. | **Shaqaalaha Dawladda** | Waxaa loola jeedaa shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda, sida uu qabo xeerka shaqaalaha Rayidka ah ee DPL Xeer Lr.12 ee 2018. |
| 8. | **Carruur** | Waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka yar da'da Shan iyo toban (15) sano, sida ku cad Dastuurka Puntland Qodobka 31-aad, Faqradiisa 1-aad. |
| 9. | **Ciidamada** | Waxaa loola jeedaa ciidamada nabadgelyada dawladda Puntland sida ku cad qodobka 86-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 10. | **Hawlgal** | Waxaa loola jeedaa hawlgallada ka dhanka ah Maandooriyaha ee ay fuliyaan ciidamada nabadgelyada Dawladda Puntland. |
| 11. | **Gaadiid** | Waxaa loola jeedaa wax kasta oo qaada maandooriye, sida, gawaadhida, diyaaradaha, maraakiibta, doonyaha iyo nooc kasta oo kale oo gaadiid noqon kara. |
| 12. | **Xeerka Ciqaabta** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (X.C.S) Xeer ( Lr.5) soona baxay sannadkii 1962. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Cutubka 1-aad
## Qodobo Hor-dhac ah
### Qodobka 1-aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka La Dagaalanka Maandooriyaha"

### Qodobka 2-aad
### Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa:-

b. Ilaalinta anshaxa iyo dhaqanka suuban ee Islaamka.
t. Ilaalinta Caafimaadka iyo bed-qabka Bulshada.
j. La-dagaalanka maandooriyaha iyo ciqaabidda qof kasta oo ay ku caddaato ku lug yeelashada falalka lagu mamnuucay xeerkan qodobkiisa 4-aad.

### Qodobka 3-aad
### Mabaadi'da Xeerka

Xeerkani wuxuu ku dhisan yahay Mabaadi'dan soo socota:-

1. Mabaadi'da Guud ee Shareecada Islaamka ee mamnuucaysa waxyeelaynta caqliga bani-aadamka ee ku xusan Xeerka Madaniga Soomaaliyeed qodobkiisa 1-aad faqrada 2-aad iyo Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 9-aad.
2. Ilaalinta nabadgelyada iyo xasiloonida si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee Dalka.

## Cutubka 2-aad
## Fal-dambiyeedka iyo Ciqaabaha
### Qodobka 4-aad
### Reebnaan

Waxaa reebban samaynta, keenidda, beerista, gacansiinta, isticmaalka iyo ka ganacsiga dhammaan noocyada Maandooriyaha ee deegaannada Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 5-aad
## Ciqaabaha

1. Qof kasta oo ay ku caddaato inuu sameeyo, keeno, beero, ka ganacsado sidoo kalena gacan ku siiyo dhammaan noocyada maandooriyaha lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa saddex (3) ilaa siddeed (8) sano oo xarig ah oo aan iib lahayn iyo ganaax lacageed oo dhan $4,000 (afar kun oo doolar) ilaa $10,000 (toban kun oo doolar) ama Sh.So u dhigma.
2. Qof kasta oo ay ku caddaato isticmaalka Maandooriyaha lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa laba (2) ilaa saddex (3) sano oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo aan ka yarayn $2000 (laba Kun oo Doolar), kana badnayn $3000 (Saddex kun oo doolar) ama Sh.So u dhigma iyo ciqaabta Shareecada Islaamku u jidaysay.
3. Qof kasta oo ay ku caddaato caadaysiga isticmaalka Maandooriyaha, waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan isla qodobkan, faqradiisa 2-aad oo laban laaban, sida uu dhigayo qodobka 55-aad, faqraddiisa 1-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo ciqaabta Shareecada Islaamku u jidaysay.
4. Qof kasta oo isku daya falalka lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee Xeerkan waxaa lagu ciqaabayaa hal (1) sano ilaa laba (2) sano oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo dhan $1000 (kun doolar) ilaa $2000 (laba kun oo dollar) ama Sh.So u dhigma.
5. Qofkii ay ku caddaato inuu qof kale u qariyey maandooriyaha lagu mamnuucay Qodobka 4-aad ee xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa hal (1) sano oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo aan ka yarayn labo Kun ($ 2,000) oo doolar ama Sh.So u dhigma.
6. Ciqaabta ku xusan farqada 5-aad ee qodobkan way siyaadaysaa haddii ay caddaato in ujeedka qarinta maandooriyaha uu yahay si loo galo fal-dambiyeed kale, sida in qofka looga faa'iidaysto jinsi ahaan iyo wixii la midka ah.
7. Qofkii ay ku caddaato inuu qof kale si khasab ah u siiyey maandooriyaha lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee Xeerkan waxa uu galayaa fal-dambiyeed sida ku cad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed qodobkiisa 27-aad, waxaana lagu ciqaabayaa laba (2) sano oo xarig ah ama ganaax lacageed oo aan ka yarayn $3,000 (Saddex Kun oo doolar) ama Sh.So u dhigma.
8. Qof kasta oo u-qaybiya ama siiya Carruurta iyo dadka maskaxda ka jirran maandooriye, waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabaha ku xusan qodobkan oo la kordhiyay sida uu dhigayo qodobka 118-aad ee X.C.S.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 6-aad
## Shaqaalaha Dawladda

1. Haddii shaqaalaha dawladdu galaan faldembiyeedyada ku xusan qodobka 4-aad ee xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan, waana loo kordhinayaa sida ku xusan qodobka 118-aad ee X.C.S, xukunka ciqaabta waxaa loo raacinayaa ciqaabta ku xusan qodobka 103-aad ee X. C.S oo ah in muddo dhan toban (10) sano aanu qaban karin xil dawladeed.

2. Haddii shaqaalaha Dawladdu uu yahay ganacsade waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan, waxaana loo raacinayaa in shatiga ganacsiga laga laalo muddo dhan toban (10) sanno.

## Qodobka 7-aad
## Mas'uuliyiinta Dawladda ee Xasaanadda leh iyo kuwa aan Xasaanadda lahayn

1. Haddii mas'uuliyiinta xasaanadda leh ee dowladdu ay galaan faldembiyeedyada ku xusan qodobka 4-aad ee xeerkan waxaa lagu samaynayaa xasaanad ka qaadis, waxaana lagu ciqaabayaa ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan.
2. Haddii dhammaan mas'uuliyiinta kale ee dawladdu galaan faldembiyeedyada lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee xeerkan waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan.
3. Haddii mas'uuliyiinta ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan galaan faldembiyeedyada lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee xeerkan waa loo kordhinayaa ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan sida uu qabo qodobka 118-aad ee X.C. S, xukunka ciqaabta, waxaa loo raacinayaa ciqaabta ku xusan qodobka 103-aad ee X.C.S oo ah in muddo dhan toban (10) sano aanu qaban karin xil dawladeed.
4. Haddii mas'uuliyiinta ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan yahay ganacsade, waxaa ciqaabaha ku xusan qodobkan loo raacinayaa in shatiga ganacsiga laga laalo muddo dhan tobon (10) sano.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 8-aad
## Ciidamada Nabadgelyada

1. Haddii qof ama koox ka mid ah ciidamada nabadgelyada dawladda Puntland galaan fal-dembiyeedyada ku xusan qodobka 4-aad ee xeerkan waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan.
2. Saraakiisha ku kacda fal-dembiyeedyada ku xusan qodobka 4-aad ee xeerkan, waxaa lagu samaynayaa derajo ka xayuubin, waxaana lagu ciqaabayaa ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan.
3. Haddii ciidamada ama saraakiisha nabadgelyada dowladda Puntland galaan faldembiyeedyada lagu mamnuucay qodobka 4-aad ee xeerkan waa loo kordhinayaa ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan sida uu qabo qodobka 118-aad ee X. C. S, xukunka ciqaabta waxaa loo raacinayaa ciqaabta ku xusan qodobka 103-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed oo ah in muddo dhan toban (10) sano aanu qaban karin xil dawladeed.
4. Haddii ciidamada ama saraakiisha nabadgelyada ee ku xusan farqadaha 1-aad, 2-aad iyo 3-aad ee qodobkan uu yahay ganacsade, waxaa ciqaabaha ku xusan qodobkan loo raacinayaa in shatiga ganacsiga laga laalo muddo dhan tobon (10) sano.

## Qodobka 9-aad
## Isticmaalka Daawooyinka

1. Waxaa mamnuuc ah keenista, iibinta iyo ka ganacsiga daawooyinka isticmaal koodu noqon karo maandooriye.
2. Daawooyinka ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan, waxaa lagu keeni karaa dhulka Puntland, oggolaanshaha Wasaaradda Caafimaadka Puntland.
3. Daawooyinka ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan ee lagu keenay oggolaansho Wasaaradda Caafimaadka, waxaa loo isticmaali karaa xaalad caafimaad oo kali ah waxaana lagu iibin karaa warqad dhakhtar la aqoonsan yahay.
4. Cid kasta oo ku xad-gudubta farqadaha qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabaha ku xusan qodobka 5-aad ee xeerkan.
5. Haddii dhakhtar la aqoonsan yahay u siiyo qof kale ama ugu mudo daawooyinka noqon kara maandooriye xaalad caafimaad darteed looma ciqaabi karo dhakhtarka.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Cutubka 3-aad
## Xarig iyo La Wareegid
## Qodobka 10-aad
## La wareegidda Gaadiidka iyo Maandooriyaha

1. Qof kasta oo gaadiidkiisa ku soo galiya maandooriye dhulka Dawladda Puntland, maandooriyayaasha iyo gaadiidka sidaba Dawladda ayaa la wareegaysa, sida ku cad qodobka $183^{aad}$ ee X.C.S.
2. Mulkiilaha ama wadaha gaadiidkiisu dhulka Dawladda Puntland soo galiyo maandooriye, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaaraya laba (2) sano ilaa saddex (3) sano.
3. Haddii ay caddaato in mulkiilaha ama wadaha gaadiidka sidaa maandooriyaha aanu ogayn, warna ka hayn daroogada saaran gaadiidkiisa, wax ciqaab ah yeelan maayo, dawladduna waxay la wareegaysaa maandooriyaha saaran gaadiidkaas.

## Qodobka 11-aad
## Guryaha Lagu iibiyo Laguna Kaydiyo Maandooriyaha

1. Mulkiilaha leh guri wuxuu galayaa fal-dambiyeed haddii ay caddaato inuu si ogaal ah uga kireeyo gurigiisa dad ka ganacsada ama ka shaqeeya maandooriyaha lagu mamnuucay qodobka $4^{-aad}$ ee xeerkan, waxaana lagu ciqaabayaa saddex (3) sano oo xarig ah ama ganaax lacageed oo aan ka yarayn labo ($2,000) kun oo doolar ama Sh.So u dhigma.
2. Dawladdu waxay la wareegi kartaa guriga lagu iibiyo ama lagu kaydiyo maandooriyaha, marka ay caddaato in mulkiilaha gurigaasi yahay caadayste.

## Qodobka 12-aad
## Hubka Lagu soo qabto Hawlgallada La-dagaalanka Maandooriyaha.

Hubka iyo agabka dagaal ee kale ee lagu soo qabto hawlgallada la-dagaalanka maandooriyaha dawladda ayaa la wareegaysa marka ay maxkamadi xukunto.

## Qodobka 13-aad
## Lacagaha Lagu soo qabto Hawlgallada La-dagaalanka Maandooriyaha

Dawladdu waxay la wareegaysaa lacagaha laga sameeyo maandooriyaha ee lagu soo qabto hawlgallada la-dagaalanka maandooriyaha, waxaana loo isticmaalayaa horumarinta danta guud marka ay maxkamadi xukunto.

## Qodobka 14-aad
## Ciqaabaha iyo Ganaaxyada

Dhammaan ciqaabaha iyo ganaaxyada ku xusan xeerkan lama iibsan karo.

# CUTUBKA 4-aad
# QODOBO GUNAANAD AH

## Qodobka 15-aad
## Magdhaw

Khasaaraha Dhaqaale ee ka dhasha hawlgallada la-dagaalanka Maandooriyaha wuxuu Garsooruhu dusha ka saari karaa dambiilaha ama dambiilayaasha lagu soo qabtay hawlgalka sida uu qabo qodobka 158-aad ee X.C.S.

## Qodobka 16-aad
## Laalid

1. Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin axkaamta ku xusan Xeerkan waa la laalay.
2. Xeerkani wuxuu laalay qodobada 342, 343, 411, 412, 413, 414, 415, 416 iyo 417 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, kuwaas oo aan la socon karin ciqaabaha iyo ganaaxyada ku xusan xeerkan.
3. Qodobada kale ee ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Madaniga iyo Habka Madaniga iyo dhammaan Xeerarka kale ee xiriirka la leh kuwaas oo aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo axkaamta Xeerkan waa la dabakhayaa marka la fulinayo Xeerkan.

## Qodobka 17-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR